GOLAHA ISKAASHIGA DOWLAD GOBOLEEDYADA -GIDG-

WAR-MURTIYEED

Taariikh, 14-Sabtember 2018

Tan iyo intii ka danbaysay shirkii Kismayo Sebtember 2018 ee Goluhu ka soo saarey War-murtiyeed diirada lagu saarayey xaaladaha siyaasada, Amniga oyo arrimaha bulshada ee dalku marayo oo hoos u dhac ba'ani ku yimid, Goluhu wuxu Dowlada dhexe ka filayey in ay jawaab ku haboon tilmaamihii iyo talooyonkii uu warmurtiyeedku xambaarsanaa ka bixin doonto. Waxaase nasiib daro ah in taas badalkeeda ay Dowladu qaadeyso tilaabooyin isdaba joog ah oo xaaladaha uga sii dareya taas oo lagama maarmaan ka dhigaysa in go'aamo deg dega oo dalka lagu bad baadinayo la qaato. Ilaa iyo hada jawaabta ka soo yeertey dowlada dhexe waa warqad ka timid Madaxweynaha oo uu shir isugu yeerayo Golaha Amniga Qaranka oo caadi ah sidii iyada oo aysan wax dhib ah jirin.

Hadaba Qiimeyn iyo wada tashi dheer oo Goluhu ka yeeshay arrimhan soo cusboonaadey, Madaxda Dawlad Goboleedyadu waxay isla qaateen qodobadan hoos ku xusan:

1. wuxuu soo dhoweeynayaa in wada hadal iyo wada xaajood lagu dhameeyo khilaafyada u dhexeeya Dowlada dhexe iyo Golaha Skaashiga Dowlad Goboledyada si taasi ku suuro gashana waa in Dowladu joojiso faragalimaha qaawan ee ee joogtada ah ay ku wado arrimha gudaha ee dowlad Goboleedyada.
2. Maaddaama arrimaha taagan dhowr jeer oo hore looga hadlay Golaha Amniga Qaranka, waxna aysan ka fulin ballamadii laga galay xallintooda, in loo baahan yahay daraf saddexaad oo door dhexdhexaadin, iyo damaanad qaade ka ahaada shir kasta oo arrimhan looga wada hadlayo.
3. In la isla meel dhigo ajendaha lana soo dhammeystiro, si looga wadahadlo dhammaan qadobada tabashadu ka taagan tahay ee ku qoran warmuriyeedkii Kismaayo, September 2018.
4. Sababo Amni awgeed, in la isla meel dhigo goobta shir ku ka dhacaayo, iyo suggidda amnigeeda.
5. Goluhu wuxu rajeynayaa in Dowlada dhexe garwaaqsan doonto baahida deg dega ah ee loo qabo in xal waaro laga gaaro arrimaha la isku hayo si dadka iyo dalka loo badbaadiyo.

----------Dhamaad----------